


Natiijooyinkii Qiimeynta Caafimaad ee bulshada ee Degmada Carver County ee 2019

HADAFYADA

- 1** Fahmida waxa saameeya caafimaadka
- 2** Sameynta qorshe bulshada oo dhan ka jira oo wax ka qabta walaacyada dhanka caafimaadka ee waaweyn
- 3** Hagaajinta caafimaadka dhamaan dadka ku nool, ka shaqeeya, wax ka barta ama ku ciyaara degmada

DULUCDA




WILICDA MACLUUMAADKA

Guryaha

In dhow 40% guryo-kiraysataasha degmada Carver **si ba'an ayey qaali ugu yihiin**, taasoo keenta in lacag yari u soo harto kharashyada kale sida cuntada iyo daryeelada caafimaad.

Isha: U.S. Census Bureau, 2013–2017 ACS Kiraysataasha Mulkiileyaasha

Qoysaska Degmada Carver ee Kirada Guryahu Qaaliga ku Tahay



\$ Jabnaanta

Xataa kaar caafimaad marka ay haystaan, dad badani ma helaan daryeelka ay u baahan yihiin waayo waa qaali.

16% dadka degmadu waxa ay sheegeen in kharashka daryeelka caafimaadku uu ka dhigo dhib inay bixiyaan kharashyada kale, ayna gataan waxyaabaha kale ee loo baahan yahay sida cuntada gaadiidka, iyo guryaha.

Kiradu aad bay qaali u tahay oo waa ay adag tahay in guri lacagtii lagu gadan lahaa meel la dhigo.

Ka qayb galaha kooxda gaar wax u eegida



Xiriirka

Qiimeyntu waxa ay soo heshay waxa ay iftiimisay xaalado badan oo ka **warqabid la'aan iyo fahmid la'aani ay ka hor istaagtay** in dad badan ay helaan fursado ay ugu raadsadaan caafimaad buuxa iyaga iyo qoysaskoodaba.

Dadku ma yaqaanaan cidda la waco ama meesha la tago si caawimaad loo helo.

Ka qayb galaha kooxda gaar wax u eegida



Gaadiidka

Dad badan gaar ahaan kuwa dakhligoodu kooban yahay ama curyaanka ama jiraan ma helaan gaadiidka fiican oo ay raaci karaan

Ka qayb galaha kooxda gaar wax u eegida



In dhow 30% waayeelka degan Degmada Carver waxa ay sheegeen in gaadiid la'aani ka hor istaagtay inay tagaan meelaha ay doonayaan inay tagaan oo ay ku jiraan shaqooyinka, balamaha caafimaad ama soo adeegashada.


Ma doonaysaa akhbaar kale?

www.co.carver.mn.us/CHA


Fayoobida jir ahaan iyo maskax ahaanba

Dadka **cidla jooga ahi ee kaligood nooli waxa ay khatar u yihiin:**

- Tacadi
- kali-ahaan
- murugo
- dhaawac



Khamri ka Dhargida iyo Da'aha



Khamro ka dhargida dadka Degmada Carver **waa ka badan tahay celceliska** gobolka oo dhan waxa ayna si gaar ah ugu badan tahay qoysaska dakhligoodu sareeyo.

Isha: 2018 Aftida Caafimaadka Dadka waaweyn ee Degmada Carver